Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

# Fahanka kooxda adeega loogu yeesho "Dadka waa wayn ee qaba baahiyaha taageerada aadka u saraysa"

## Maxaa hagahan loogu talo galay inuu qabto?

Hagahan waxa uu kaa caawiyaa inaad fahanto waxa uu yahay adeega kooxda, sida go'aan looga gaadho, iyo sida rafcaanka loo qaato, haddii aad diido natiijada. Macno ma leh natiijada, ha iloobin in aad hogaanka qaban doonto go'aan ka gaadhida sida aad u doonayso inaad adeegyada ku hesho si ay kaaga caadiso ka guul gaadhida hadafyadaada.

## Waa maxay Qiimaynta Baahiyaha Oregon?

Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA) waxay naga caawiyaan gaadhida hiigsigaaga nidamka taageerooyinka ay fududahay in la isticmaalo iyo jawaab degdeg ah u ah awoodaha iyo tilmaanta dadka naafada ah iyo qoysaskooda.

Qiimaynta Baahiyaha Oregon waa agab uu isticmaalo Xafiiska Adeegyada Naafada Koboceed (ODDS) si loo helo macluumaad ku saabsan waxa uu yahay nooca caqabadaha aad qabto haddii aanad haysan taageero. Waxaa dhammaystiray qofka loogu yeedho Qiimeeya, oo wata caawimada ka timid adiga, kuwan kale ee aad doorato.

Macluumaadka waxaa loo isticmaalaa inay caawiso adiga, iyo kuwan aad doorato inay kaa caawiyaan qorshaynta, uu ka hadlo wax ku saabsan nooca ay tahay taageerada aad jeclaan lahayd noloshaada. Qiimaynta Baahiyaha Oregon (Oregon Needs Assessment) ma aqoonsato sida aad u doonayso in laguu taageero, ama waxa aad rumaysan tahay inay ku doonto inaad gaadho hadafyadaada — la sameeyo muddada nidaamka Taageerada qorshaynta gaarka ah. Adiga, oo wata taageerada kuwan aad doorato, waxaad go'aamin

doontaa waxay tahay taageerada sida ugu fiican u buuxin doonto baahiyahaaga oo kaa caawin doonta inaad gaadho hadafyadaada. Qiimayntaada Baahiyaha Oregon waa adeega ka yimaada kooxda oo ah hal qayb oo nidaamka qorshaynta ah.

## Sababtee ayay kooxaha adeegu muhiim u yihiin?

Haddii aad doorato inaad hesho adeegyada naafanimda koriinka sidaa hal ma mid ah taageerooyinka noloshaada, kooxdooda adeega waxay go'aan ka gaadhaa saacadaha u badan ee adeeg bixiyaha daryeelka ("adeeg bixiyaha") waxaa la bixin doonaa si laguu taageero adiga bil kasta. Kooxdaha adeega sidoo kale waxau go'aan ka gaadhaan inta ay leegtahay adeeg bixiyaha inta la siin doono marka ay ku taageeraan adiga.

## Sidee loo go'aamiyay adeegayga kooxda?

Su'aalaha gaarka ah ee Qiimaynta Baahiyaha Oregon waxaa loo isticmaalaa in go'aan lagaga gaadho kooxdayda adeega. Hagahan waa uu sii socon doonaa si uu u sharaxo dhab ahaan sida ay u shaqayso.

## Sidee adeegyada kooxda loo habeeyaa?

Kooxaha adeega marka koowaad waxaa abaabula da'da qofka, sida dhallaan/socod barad (dhalasho ilaa 3), ilma yar (4 ilaa 11), kuray (12 ilaa 17), qof wayn (18+). Gudaha heerka da' kasta, waxaa jira kooxaha adeega oo kala duwan oo ku salaysan baahiyaha taageerada.

## Maxaa sabab in qof loo qoondeeyo Qof wayn: Kooxda adeega aadka u sareeya?

Qofka waxaa loo qoondayn doonaa koodan adeega iyaddoo ay sababtay wax ka mid ah kuwan soo socda:

- baahiyaha taageerada guud ee aadka u saraysa (waxa loola jeedaa, hawlaha nolosha maalinlaha ah (ADLs) iyo hawlaha waxtarka leh ee nolosha maalinlaha ah (IADLs)
- hal ama xaalad(o) caafimaad oo ka badan oo u baahan darajo taageero oo aad u saraysa


- caqabadaha dhaqanka u baahan darajo aadu saraysa oo taageero

Dadka ku jira xiliga Qofka wayn: Kooxda adeega aadka u sareeya dhammaan waa shakhsiyaad gaara ah. Waxay ku jiraan isla koox adeeg sababtoo ah nooca heerka caafimada ay u baahan yihiin waa isku mid.

## Waa maxah baahida taageerada guud heelka qiimayta Qofka wayn: Aad u sareeya?


Si loo qiyaaso baahida taageerada guud, xooga waxaa la saarayaa jawaabaha Qiimaynta Baahiyaha Oregon su'aasha ku saabsan hawlaha nolosha maalinlaha ah iyo hawlaha waxtarka u leh nolol maalmeedka (ADLs/IADLs). ONA waxay waydiisay wax ku saabsan hawlaha badan oo kala duwan oo ah nolol maalmeedka iyo inta ay leegtahay taageerada qofka u baahan hawlahan.

Su'aal kasta, jawaabaha waxay yihiin qiyaasta laga bilaabo 1 ilaa 6. Qiyaasta su'aal kastaa waxay u eegtahay:




Jawaabaha su'aalaha qaarkood ee ONA waxaa loo isticmaalaa si loo abuuro hal buundada guud ahaaneed Baahida Taageerada Guud (GSN) buundo.

Jawaabaha koowaad ee ku saabsan lebiska iyo dhaqaaqa ONA waxaa la isugu xidhaa labba sheey:




Markaa, lebiska iyo dhaqaaqa sara lagu muujiyay waxaa lagu daraa labba iyo toban jawaabaha su'aalaha kale ee ku jira ONA. Afar iyo toban jawaabood oo lagu daray waa:

| | | | |
|---|---|---|---|
| Xidhashada / Iska bixinta kabbaha | Cunista | Sixada musqusha | Tuushaka/ maydhashada |
| Nadaafada Afka | Nadaafada kale ee guud | Shaqada guriga | Samee cunto fudud |
| Dharmaydhka | Isticmaal gaadiidka dad waynaha | Maamulka lacagta | Wax iibsiga fudud |
| | Lebiska | Dhaqaaqa | |


Haddii aad doorato inaanaan ka jawaabin su'aasha ONA ama su'aasha aanay habboonayn, jawaabtaas waxa la siiyaa buundo ah 1. Haddii hawsha aan la isku dyeyin iyaddoo ay sababtay xaalad caafimaad ama walaaca badbaadada, jawaabtaas waxaa la siiyaa buundo ah 6.

Jawaabaha afar iyo tobankan su’aalood waa lagu daraa oo wadartu waxay noqon doontaa 14 iyo 84. Lambarada waxaa loogu yeedhaa buundada GSN. Dadka waa wayn ee leh buundada GSN ee u dhacaysa 74 iyo 84 waxaa loo qoondeeyaa Qof wayn ahaan. Kooxda adeega aadkau sareeya

## Waa maxah baahida taageerada caafimaad heelka qiimaynta Qofka wayn: Aad u sareeya?

Xoog saarida ee heerkan qiimaynta waa su’aalaha Qiimaynta Baahiyaha Oregon ee ku saabsan baahiyaha taageerada caafimaadka. Hawlaha ONA waxay waydiiyaan wax ku saabsan daawaynta caafimaadka kala duwan iyo daawaynaha, gaar ahaan inta jeer ee aadu baahan tahay daawayn kasta ama daawayn.

FSu’aal kasta, jawaabaha waxaa laga tirtiyaa qiyaasta laga bilaabo 0 ilaa 3. Qiyaasta su’aal kastaa waxay u eegtahay:




Jawaabaha su’aalaha soo socda ee labbaatabka iyo sideeda ah ee ku saabsan daawaynta caafimaadka iyo daawaynta markaa waxaa lagu daraa iyaddoo la isticmaalayo qiyaasta sare.

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Daawaynta neefsashada | Nidaamka ka soo saarida dheecaanka xabadka | Foorarinta qofka si laabta wax uga yimaadaan | Qalabka dawada la isku buufiyo ku jirto | Daawaynta hawada la gelinayo marinka hawada |
| Nuugida afka ah, daloolka afka ah oo keliya | Nuugida marinada hawada | Ka soo nuugida marinka hawada | Ka soo nuugida dalqada sanka | Ka soo nuugida afka ah ee kale |
| Daryeelaka daloola dhuunta | Daryeelka laynka dhexe | Mudditaanada xididka laga qaato | Muddista muruqa maqaarka ka hoose | Tuumbada xidmaha cuntada lagu geliyo |
| Sanka laga qaato ama tuumbada quudinta gudaha caloosha | gelinta ama ka warhaynta katiitarka gumaadka | gelinta katiitarka (goos-goos ah) | CPAP/BiPAP | Qalabka hawaynta makaanikada ah |
| Daawaynta oksajiinta | Qaliinka jarida xidmaha, qaliinka meel kale ka soo saarida kaadida | Ka saarida qashinka dhiiga marka kelyahu qaban waayaan | Maydhida Kelyaha | Ka warhaynta Dawaynta bararka maskaxda |
| | Bamka Baklofen | Daryeelka nabarka | Daawaynta marxalada III ama nabarada IV | |

Wadarta jawaabaha sideed iyo labbaatanka su'aalood waxaa loogu yeedhaa buunada Baahida taageerada Caafimaadka (MSN). ONA sidoo kale waxay waydiinayaan haddii qofku uu sameeyo daawaynta ama daawaynaha.

Waxaa laguu qoondeeyay kooxdan haddii aad leedahay buunada MSN ee u dhaxaysa 5 iyo 84 oo aad leedahay ugu yaraan hal daawaynta caafimaadka ah ama daawaynta uu sameeyo qofku.

## Waa maxah baahida taageerada dhaqameed heelka qiimaynta Qofka wayn: Aad u sareeya?

ONA waxay waydiisaa wax ku saabsan caqabadaha dahqanka kala duwan iyo taageerooyinka loo baahan yahay ee caqabadahan. Qof ayaa loo qoondeeyay Qofka wayn: Kooxda aadka u saraysa ee ku salaysan jawaabaha soo socda:

**Labba ka mid ah** dhaqmadan caqabada leh waxay joogeen sanadkii hore (ama waxay joogi doonaan haddii aanad haysan taageero):

- nafta dhaawacaysa
- La dagaalamaysa ama ku gar daroonaysa
- Dagaal galmo/weerar
- Burburinta hantida

**Iyo ugu yaraan hal ka mid ah noocyadan** taageerada waxaa la isticmaalaa:

- Farsamooyinka wax ka qabadka/ ishaarida jidhka ah ugu yaraan si maalinle ah
- Wax kaqabadka badbaadada ugu yaraan bil kasta
- Adeegyada gurmadka/dhibta labba wakhti sanadkii la soo dhaafay

**Iyo labbadan** su'aalood waxaa lagaga jawaabay "haa":

- Qorshaha Taageerada Dhaqanka Wanaagsan la sameeyay
- Qorshaha Taageerada Dhaqanka Wanaagsan la hirgeliyay

Haddii aad jeceshahay inaad aragto Qiimaynta Baahiyahaaga Oregon si aad u aragto inta buundo ee aad heshay, waxaad ka heli kartaa Isuduwaha Adeegyada ama Wakiilka Gaarka ah.

## Haddii aad khilaafto kooxdaada adeega laguu qoondeeyay

Adiga, iyo kuwan doorta inaad ku haysato noloshaada, si wanaagsan waxay u fahmaan waxa aad u baahan tahay inaad ka guul gaadho hadafyadaada. Waxaad leedahay xaqa macaamilka cadaalada ah marka aanad aqbali go’aamada la gaadho ee ku saabsan adeegyada iyo taageerada aad hesho.

Linkigan hoose waxa uu faahfaahiyaa tallaabooyinka aad qaadi karto haddii aad aqbali waydo. Boggan waxay qeexayaan marka aad u qalanto ka reebid aiyo sida loo soo xareeyo iyaga, siiba heerka dhegaysiyada iyo xuquuqaha rafcaanka iyo nidaamka.

Codso dhegaysi: https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/hearings.aspx

Codso ka reebitaan:
https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/exceptions.aspx

# Ilaha

## Halka wax badan lagu baranayo

Macluumaadka dheeraadka ah ee kus aabsan sida haykalka kooxda adeega loo horumariyay iyo waxay yihiin tallaabooyinka onlaynka xiga.
https://www.oregon.gov/odhs/compass/Pages/service-groups.aspx